

Falanqaynta & Qoraal cilmi baadhis shakhsiyeedka 2023-2024

Mudane/Marwo Waalid ama Mas'uul –

Ardaygaagu waxa uu noqonayaa taariikhyahan History Day. Waxay ogaan doonaan sababta uu mawduucodu u noqday mid muhiim ku ah taariikhda dhexdeeda. Waxay horumarin doonaan bayaan qoraal cilmi baadhis shakhsiyeed ah si ay ula wadaagaan fikraddan.

A **qoraalka cilmi baadhis shakhsiyeedku** waa fikradda ardayga ta ugu wayn taas oo isku haysa mashruuca. Waa sharraxaad kooban oo ku saabsan fikradaha ardayga sababta uu mawduucodu u noqday mid muhiim ku ah taariikhda dhexdeeda. qoraalka cilmi baadhis shakhsiyeedku sidoo kale waa waddo khariidadeedka mashruucoda History Day. Ardaydu waxay u isticmaali doonaan qoraalka cilmi baadhis shakhsiyeed kooda si ay u ogaadaan macluumaadka ay u baahan yihiin in ay ku daraan mashruuca. qoraal cilmi baadhis shakhsiyeedka awoodda lihi waa in uu yeeshaa afartan astaamood.

- **Ahmiyadda:** qoraalka cilmi baadhis shakhsiyeedku waa in uu sharraxaa sida uu mawduucu u badalay taariikhda.
- **Waa in ay kor u dhaafaan sheegidda xaqiiqada oo kaliyaata:** Ardaygu waxa uu sharrixi doona sababta ay u malaynayaan in mawduucu uu yahay mid muhiimka ah taariikhda dhexdeeda.
- **Xadaysan:** Ardaydu waxay u baahan yihiin in ay sharraxaan saamaynta qof kaliyaata, fikrad ama, dhacdo. Way adagtahay in aad caddayso qoraal cilmi baadhis shakhsiyeed aad u ballaadan. Tusaale ahaan, "Martin Luther King, Jr. waxa uu si abadi ah u badalay nololaha qof kasta" maaha mid gaar ahaan ku filan.
- **Ku xidh mawduuca way nee laga hadlayo ee sannadlaha ah:** Ardaygaagu waxa uu daraasayn doonaa qoraalka cilmi baadhis shakhsiyeedka ah waxaana uu sharrixi doona xidhiidhka mawduucoda. Waxaad wax badan oo ku saabsan mawduuca wayn ee laga hadlayo ka baran kartaa www.mnhs.org/historyday/theme-and-topics.

Doorka Waalidka/Mas'uulka ilmaha

Bayaamada qoraal cilmi baadhis shakhsiyeedku waa mid ka mid ah qaybaha ugu adag ee mashruuca History Day. Tani waxay noqon kartaa markii ugu horaysay ee ardaygaagu uu qoray dood taariikheed. Sidee ayaad u caawin kartaa?

- **Noqo dhagayste fiican.** Sida badan way fududahay in fikradaha lagu sharraxo cod dheer, halkii laga qori lahaa. Dhagayso ardaygaaga. Ka caawi inay kala soocaan fikradahooda kadibna hubi in ay qoraan.
- **Ku dhiiri gali inay dib u eegaan.** Ardaydu dib u eegis iyo dib u qorid ayay marar badan samayn doonaan. Xasuusi in shaqadooda adagi ay u midho dhalin doonto!
- **Ahaw qof fiican!** Qoridda qoraalka cilmi baadhis shakhsiyeedku waxay noqon kartaa mid adag. Dib u eegista iyo dhibaato xallintu waa xirfado ay mardambe uga baahnaa doonaan ardaydu dugsiga dhexdiisa, machadka, ama xirfadaha.

Waad ku mahadsantahay taageerada aad taageerayso ardaygaaga marka ay curinayaan mashruuc History Day ah! Waxaad History Day wax badan ka baran kartaa boggayaga interneka-ka, www.mnhs.org/historyday.

Sammi Jo Papas

Sammi Jo Papas
Maamulaha Barnaamijka iyo Isuduwaha dawlad goboleedka
National History Day in Minnesota
samantha.papas@mnhs.org